DEPARTMENT OF HEALTH

# Ku soo dhawoow adeegyadeena cusub!

## Waxa aan rabno inaad ogaato

Sharciyada Daryeelka Guriga ee Minnesota waxay farayaan qof kasta oo helaya adeegyada daryeelka guriga inuu yeesho Qorshaha Ka Hortagga Xadgudubka Shakhsi ahaaneed ee (IAPP). Waxaa nalooga baahan yahay inaan ku weydiino su'aalahan maadaama qof kasta oo ka shaqeeya guri dadka lagu daryeelo waxaa waajib ku ah inuu soo gudbiyo xadgudubka, dayaca, iyo dhiig-miirashada. Natiijada laga doonayo qorshayaashn waa inaad heshaa taageero.

## Waa maxay IAPP?

Kani waa qorshe ay samayn doonaan adiga iyo bixiyaha adeegga. Qorshuhu waa hab muhiim ah oo adeeg bixiyuhu isticmaali doono si uu u hubiyo inaad ka badbaado xadgudubka, marka khatartaas la ogaado. Horumarinta IAPP waxay u baahan tahay wada hadal daacad ah oo dhex mara adiga iyo bixiyaha adeegga oo ku saabsan taariikhdaada, khataraha hadda jira iyo kuwa mustaqbalkaba, iyo sida adeeg bixiyuhu kuu caawin karo si laguu ilaaliyo. Qorshuhu wuxuu noqon doonaa mid shakhsi ah oo ku salaysan baahidaada.

## Muxuu IAPP daboolayaa?

- **Xadgudubka Jirka** — garaacid, feerid, riixid, qanjaruufo, dharbaaxo, jiidid.
- **Xadgudub Afka ah** — oo dadka hortooda kugu bahdilaya; isagoo kugu yeeraya magacyo aflagaado ah, sida “doqon,” “karaahiyo,” ama “qiimo ma lihid; una xanaaqaya si cabsi aad ku dareemayso; isagoo ku hanjabaya inuu wax yeelaynayo adiga iyo dadka aad danayso, ama xayawaanka rabaayada ah; Xadgudubaha wuxuu ku hanjabayaa inuu naftiisa waxyeelo u geysan doono/doonto markuu kaa xanaaqo.
- **Xadgudubka Galmada —** taabashada aan raaliga laga ahayn ama damaca galmada, falalka galmada qasabka ah, kufsiga.
- **Ka faa'iidaysiga Maaliyadeed** — xadida alaabta, adeegyada ama lacagta. Isticmaalka xidhiidh ama xaalad si lacag lagaaga qaato, waana khiyaano maaliyadeed.
- **Dayac** — Qofku ma cunayo cuntada ilaa nafaqo darro ku dhacdo, ma qaadanayo dawooyinka loo qoray ilaa caafimaadka dhimirka uu xumaado ama isbitaal la dhigo, ma lihid nadaafadda lagama maarmaanka ah ilaa ay gaarto heer ay khatar geliso caafimaadkaaga iyo fayoobidaadaba.

Haddii aysan ku khuseyn mid ka mid ah arrimahan, waxaad calaamadin doontaa “walaac iguma ahan”.

Mahadsanid inaad waqti gelisay dib u eegista macluumadkan.

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
PO Box 64579
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4200
health.fpc-web@state.mn.us
www.health.state.mn.us

1/06/26

*To obtain this information in a different format, call: 651-201-4200.*